

SATO Hannaanka xeerarka arrimaha degaanka

Hannaanka xeerarka sida sharciyo qaabeysan, gundhiggooda, hannaanka xeerarka magaalada iyo xeerarka shirkadaha inta waxaa dheer maamulka sare ee shirkadaha xeerarka aay gooyaan. Haddaba, waa in aay degganyaasha xeerarkaa dhowraa. **Qof walba waxaa waajib ku ah in uu hannaanka xeerarkiisa aqriyo, kuna dhaqmo una sheego reerkiisa iyo martiisa in ay ku dhaqmaan xeerarkan.** Waana kuwa soo socota:

Qololka deggenayaasha ka dhexeeyo

Albaabada bannaanka waxa ay xiran yihiin wakhtiyada lagu heshiiyay oo ah 21-07. Albaabada xiran markaad ka baxdid hubso in ay xirmeen. Meelaha deggenayaasha ka dhexeeyo waa in sharqan la'aan lagu maraa. Meelahaas sigaar laguma cabi karo, bilaamicnana looma joogi karo. Nadaafadda waa in la ilaaliyaa.

Kaydsika alaabooyinka waxaa lagu kaydsan karaa meelaha loogu tala galay. **Alaabta laguma kaydsan karo jaranjarata.** Waxyaalaha gubta waa in laga taxaddaraa in aysan la dhigin meel halis ah. Qololka deggenayaasha ka dhexeeyo sida meesha dharka lagu dhaqto ama lagu wardo waxaa loogu tala galay deggenayaasha.

Qolalka

Derisga lama qashqashaati karo. Siiba saacadaha 22-07 waa in la iska ilaaliyaa qaylada iyo waxyaabaha kale ee qashqashaati karo deriska. Qolalka, balakoonka ama qaybaha kale ee dhismaha ku saabsan laguma sameyn karo sida, qaylada, gariirga, urka ama waxyaabaha derisga wax u dhibi karo. Qolalka waa in la daryeela. Musqulaha laguma shubi karo wax dhib u keeni karo ama godka xiri karo.

Balakoonada

Guryaha aad deggan tihiin balakoonadooda waa in aan dharka laga raaricinin balakoonka bannaankiisa. markaad balakoonada nadiifineysaan yeeyan qashinka bannaanka u bixin. Balakoonka laguma rakibi karo anteenno ama aalad kale kuma dhajin kartaan. idinkoon ruqsad ka heysan shirkadda guriga. Haddii ay suurto gal noqoto in aad ku rakibtaan anteenno bilaa amar adiinkaa qarashka bixinayo.

Balakoonada wax laguma karsan karo.

Bannaanka

Bannaanka waa in aad dhowrtaan nadaafadda, lama burburin karo ubaxyada, cawska, alaabta bannaanka ama leexada/wiifowka. Sigaarka waxaa lagu cabi karaa meelaha loogu tala galay. Haashka sigaarka waa in lagu damiyaa meesha loogu tala galay.

Kala sooca qashinka

Cuntada harageeda, xafaayadaha iwm ee isku dhufan lama raacin karo musqusha, ee waa in goobaha qashinka loogu talagalay la geeyo. Qashinka waa in lagu cabbeeyo bacta madow ama tan cad, lana raaco tilmaamaha qashin kala sooca. Alaabooyinka guriga ee aaydaan u baahneyn, qalabka elektroinikada laga kaaftoomo iyo wixii kale oo laga kaaftoomo, waa in la geeyaa goobaha lagu qubo ee loogu talagalay ee qashinka qubka ah.

Baarkinada gaadiidka

Baarkinada gaadiidka waxaa la dhigan karaa meelaha loogu tala galay. Waa in aad ka heysataa ogolaasho guddoomiyaha xaafadda. Haddii ay noqoto qasab in aad baabuurta ku wadaan xaafadda dhexdeeda xawaaraha baabuurka waa in uusan badneyn. **Gaadiidka lama dhigi karo jidka damdemiska.** Baarkinka martida waxaa loogu tala galay baabuurta martida.

Kaybalka korontada ee baabuurta lagu gululeeyo, loogama tagi karo barta khadka korontada laga siiyo, hadduusan baabuurka ku jirin.

Jafitaanka roogagga iyo waritaanka dharka

Roogagga ama go'aha waxaa lagu jafi ama wari karaa meelaha loogu tala galay. Dharka waxaa lagu wari karaa gudaha balakoonka ama meelaha loogu tala galay oo la sharciyeeyay.

Xayawaanka la dhaqdo

Guryaha aad deggan tihiin waxii ka baxsan, waa in aad xayawaanka la dhaqdo aad xarig ku heysaan, oo aysan marnaba carqaladeyniin deggenayaasha kale. Goobaha aay caruurta ku ciyaaraan iyo aagagga u dhow kala fogaadaa markaad bannaanka u kaxeysaan xayawaanka. Xayaawaanka la dhaqdo waa in aad indhaha ku heysaan oo aad la socotaan, waliba xagga afaafka hore iyo goobaha kale ee la wada wadaago.

Mas'uuliyada wargelinta

Dhismaha ama guryaha waxa ka halleysan sida; dubbooyinka ama bullaacadda ama fiilooyinka waa in aad sida ugu dhaqsaha badan u wargelisaa oo aad u sheegtaa mas'uulka xaafadda. Deggenayaasha waxaa laga rajeynayaa in ay si qoraal ah u wargeliyaan mas'uulka xaafadda wixii qalad ah ama qofkii sharciga jabiyo in ay sheegaan.

Ka guuritaanka

Cidda masuulka ka ah guriga ee deggan waxaa waajib ka saaran yahay in aay soo wargeliso wakiilka shirkadda guriga macluumaadka la xiriira ka guurista dabadeed cidda ku soo biirta iyo cidda ka baxdaba inta

Sharciga jabistiisa

Jabista sharciga waxay keeni kartaa in aad kabtit qarash ahaan waxa aad sameysay ama in guriga lagaa saaro.

Haddii qalad aad ku sameysid deggenayaasha ama guriga waxaa macquul ah in guriga lagaa saaro ama in aad mag bixiso ama lagu ganaaxo.